

Fitzroy Legal Service

Waxaa la saasay 1972 ayadoo ah haya'd bulsho, oo aan-faai'do doon ahayn, Fitzroy Legal Service (FLS) waa tan adeegyada sharciyeed ee bulsho ugu faca weyn Australia. FLS waxaa badanaa ka shaqeeya folanteero waxayna leedahay taariikh dheer ee xagga socodsiinta kaysaska xiisaha dadweyne leh waxayna ka cayaartaa kaalin weyn qaybaha dib-u-habaynta sharciga iyo waxbarashada sharciyeed ee bulshada.

Adeegga Talooyinka Sharciyeed ee Booqashada ah

Si loo helo adeegayaga talooyinka sharciyeed oo lacag la'aanta ah, waa inaad timaaddaa Isniinta ilaa Jumcha, inta u dhaxaysa 6.30pm iyo 7.00pm si aad u aragto qareen. Haddii aad timaado 7.00pm, qareenadeenu ma awoodi doonaan inay ku arkaan. waxaan talooyin ka bixinaa arimaha ay ka midka yihiin arimaha boliiska, maxkamad aadida, dhibaatooyinka macaamiisha, arimaha Sharciga Qoyska, shilalka Baabuurta, ganaaxyada, arimaha danbiyada, iyo arimaha shibilka. Ma bixino caawimaadda arimaha socdaalka.

Howl Maalmeedka

Howl Maalmeedkayagu wuxuu bixiyaa caawimaad sharciyeed iyo matalaad ayadoo ballan loo samaysanayo arimaha ka caawinta sharciga. Haddii aadan xaq u lahayn Caawimaadda Sharciyeed, qareenada jooga FLS way ku caawin karaan ayagoo ujrada kaa qaada. Howl Maalmeedkayagu wuxuu la tacaalaa xukunnada dambiyeed, codsiyada damiinka, dambiyada darawalnimada, Dhibanayaasha Jariimada, arimaha Sharciga Qoyska, Maxkamadda Carruurta (Jariimada) iyo rabshadda qoyska.

Xarunta Sharciga Qoyska

Xarunta Sharciga Qoyska oo lacag la'aan ah oo ku takhasustay talooyinka sharciyeed oo ku saabsan arimaha sharciga qoyska waxaa laga helaa FLS Arbacada iyo Khamiista ee galabtii. Ballan keliya.

Neighbourhoodka Justice Centre

FLS waxay leedahay qareeno oo jooga Neighbourhood Justice Centre taas oo ku taal 241 Wellington Street Collingwood.

Drug Outreach

ayadoo xoogga saaraysa yaraynta waxyeellada, Qareennada Drug Outreach waxay ujeedaan inay caawiyaan shaqsiyaadka ay hayso dhibaatooyinka sharciyeed oo la xiriira isticmaalka daroogada. Qareennada

Drug Outreach waxay bixiyaan waxbarashada sharciga bulshada, meel-u-diridda, talooyinka iyo, halkii ku haboonba, u-qareenid adeegyada kaysaska la xiriira isticmaalka daroogada.

Richmond Outreach

Adeegyadayada Outreach oo ah talooyin sharciyeed lacag la'aan ah oo Richmond ku yaal waxaa la helaa Talaadada lagana helaa North Richmond Health Centre, 23 Lennox Street, Richmond oo leh saddex ballamood 6.30pm ilaa 7.30pm. Ballan keliya.

Xarunta Sharciyeed ee Darawalka Tagsiga

Waxaan haysanaa adeega takhasusleyaasha oo ka siiya caawimaadda sharciyeed iyo matalaadda darawalada tagsiyada arimaha sharciyeed, sida ganaaxyada, xukunnada dambiyada, arimaha aqoonsiga, iyo arimaha caymiska. Soo booqo Adeegga Drop-In Service, Isniinta ilaa Jumcaha 6.30 - 8pm wixii meel-u-dirid ah ee xaruntan.

Adeegga Talooyinka Sharciyeed ee LGBTIQ

Qareennada takhsuslaha iyo paralegals waxaa la helaa si ay uga bixiyaan talooyinka iyo meel-u-dirid arimaha sharciga qoyska. Khamiis labaad oo kasta, Ballan keliya.

Xarunta Sharciga Xayawaanka

FLS waxay la shaqaysaa qareenada Xayawaanka si ay uga bixiyaan talooyinka sharciyeed oo lacag la'aan ah arimaha sharciga oo la xiriira xayawaannada, iyo sidoo kale talooyinka iyo meel-u-diridda kooxaha daryeelka xayawaanka, u-doodayaasha xuquuqda xayawaanka. Galabtii Jumcaha, Ballan keliya.

Buugga Law Handbook

Waa mid daabacan iyo mid online ah, Fitzroy Legal Service waxay soosaartaa tilmaamaha Ingiriisiga oo ballaaran oo fudud Victoria dhexdeeda ee sharciga Victoria. Ka eeg lawhandbook.org.au wixii helitaan online ah ama gado koobiga daabacan, ka eeg fitzroy-legal.org.au.